IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 30ka Maarso 1988, Lr. 2 R 3

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee**

## K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

W. M.

QEYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 14 ee 8 BOG. 221
Maarso 1988, Billad Qalin Kacaannimo

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 8 » 222
Maarso 1988, Billad Maar Kacaannimo

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 16 ee 5 » 223
Maarso 1988, Magacaabid ku-xigeenka La taliyaha Sharciga ee Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 17 ee 1 » 224
Maarso 1988, Heshiis Goboleed ku saabsan dhowritaan Bey'adda Badda Cas

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 18 ee 1 » 225
Maarso 1988, Heshiiska Ilaalinta Maamulka
Horumarinta Bey'adda Badeed iyo Xeebta
G/da Bariga Afrika.

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٩ بتاريخ ١٤ فبراير ١٩٨٨ :
التصديق على اتفاقية قرض بشأن دعم القطاع الزراعي — ٦٢٢

XEER WASAARADDA GAADIDKA B.& DEKE » 227
DAHA L. 9 ee 1.2.88, Guddiga Rarka Nooliga.

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH.

DAWLADDA HOOSE MUQ. 8.7.86, Naado Dhul » 228
J/le Maxamuud Yuusuf Muuse L. 150

DAWLADDA HOOSE EE MUQ. 8 Okt. 1986, » 229
Naado Dhul J/le Maryan Xaashi Xuseen L. 151

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBED » 230
20.12.87, Dumid J/War. L. 0367147 ku qoran
Cabdirisaaq Caydiid Xaashi L. 153

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBED » 231
18.2.88, Lumid J/War. L. 542402 ku qoran
Axmed Cabdi Cumar L. 154

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBED » 232
15.2.88, Lumid J/War. L. 0867316-742810
ku qoran Maxamuud Cabdi Aadan L. 155

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 8.3.88, Lu » 233
mid J/War. L. 1001493 ku qoran Faarax
Axmed Faarax L. 156

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 8.3.88, Lu » 234
mid J/War. L. 1087818 ku qoran Faarax
Axmed Faarax L. 157

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 6.3.88, Lu » 235
mid J/War. L. 0385557 ku qoran Axmed
Yuusuf Shide L. 158

MAXKAMADDA GOB. W/GALBED, 24.1.88, Lu » 236
mid J/War. L. 0392926 ku qoran Axmed
Cabdi L. 159

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 8.3.88, Lumid J/War. L. 0392926 ku qoran Cab/casiis Jaamac Maxamed L. 160 » 237

MAXKAMADDA GOB. TOGDHEER, 1.3.88, Lumid J/War. L. 0501322 ku qoran Dayr Maxamed Yuusuf L. 161 » 238

MAXKAMADDA GOB. BANAADIR, 11.2.88, Lumid J/War. L. 0651225 ku qoran Salaad Axmed Xasan L. 162 » 239

MAXKAMADDA GOB. W/GALBED, 18.2.88, Lumid J/War. L. 0360901 ku qoran Khayre Cabdullaahi Rooble L. 163 » 240

MAXKAMADDA GOB. D/BERBERA, 21.2.88, Lumid J/War. L. 0499533 ku qoran Axmed Cabdullaahi Maxamed L. 164 » 241

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED, 18.2.88, Lumid J/War. L. 542402 ku qoran Axmed Cabdi Cumar L. 165 » 242

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.3.88 Lumid Jeeg War. L. 1003549 ku qoran Axmed Aadan Cumar L. 166 » 243

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 16.3.88, Lumid Jeeg War. L. 0773456 ku qoran Shariif Abuukar Shariif L. 167 » 244

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.3.88, Lumid 8 Jeeg War. ku qoran Axmed Ciise Islaan L. 168 » 245

MAXKAMADDA G/DEG. BERBERA, 12.11.87 Lumid Jeeg War. L. 720780 ku qoran Yaasiin Maxamed Xasan L. 169 » 246

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 24.2.88 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Xayd Aw Faarax L. 170 » 247

# QAYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 14 ee 8 Maarso 1988, Billad Qalin Kacaannimo oo lagu maamuusay Jaalleyaasha Jaalle Khadiija Macallin Ismaaciil iyo Jaalle Sahra Xuseen Ismaaciil.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaamarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha U.D.-H.S. iyo tan Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee X.H.K.S.;

MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka ah, Kacaannimo, Waddaninnimo ay muujiyeen si hagar la'aan iyo dadlid la'aan uga soo qaybgaleen horumarinta dhaqdhaqaaqii dhismaha Ururka Demoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagamaarmaan tahay in Dadka ku sifoobay Kacaannimo, Hawlkarnimo, Niyadsami iyagoo u gutay si hagar la'aan ah waajibaadkii ka saarnaa Dalkoodi, Ummaddoodi iyo Haweenkii ay wakiilka ka ahaayeen la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudan yihiin Kacaankooda, lagana reebo raad wax ku ool leh;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka Keliya

Waxa lagu maamuusay BILLAD QALIN KACAANIMO AH JAALLE KHADIIJA MACALLIN ISMAACIIL IYO JAALLE SAHRA XUSEEN ISMAACIIL.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu Madaxweynaha J.D.S. soo saxiixo.

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 15 ee 8 Maarso 1988, Billad Maar Kacaannimo oo lagu maamuusay 12 Gobol; ee U.D.H.S.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 65aad ee 19ka Oktoobar 1970 ee Abaalmarinta;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha U.D.H.S. iyo tan Kaaliyaha Xoghayaha Guud ee X.H.K.S.;

MARKUU TIXGELIYEY: Dadaalka Dheeraadka ah, Kacaannimo ay muujiyeen U.D.H.S. gobollada qaarkood ee hoos ku qoran muddadii ay soo jireen oo haatan 11 jirsadeen, loona dabaaldegaayo 11 Guuradiidii;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay lagamamaarmaan tahay in Hay'adaha ku sifoobay Kacaannimo, Hawlkarnimo, Niyadsami iyagoo u gutay si hagar la'aan ah waajibaadkii ka saarnaa Dalkoodii, Ummaddoodii iyo Haweenka ay Wakiilka ka yihiin la guddoonsiiyo aqoonsiga ay ka mudan yihiin Kacaankooda, lagana reebo raad wax ku ool leh:

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Guddiga Abaalmarinta MJDS:

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qodobka Keliya

Waxa lagu maamuusay BILLAD MAAR AH EE KACAANNIMO URURADA DIMOQRAADIGA HAWEENKA SOOMAALIYEED ee ka dhisan Gobolladan soo socda: Gobolka Banaadir, Gobolka W/Galbeed, Gobolka Bari, Gobolka Bay, Gobolka Awdal, Gobolka Sh/Hoose, Gobolka Sh/Dhexe, Gobolka Jubbada Hoose, Gobolka Hiiraan, Gobolka Galguduud, Gobolka Togdheer iyo Gobolka Mudug.

Xeerkanu wuxuu dhaqangalayaa markuu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Muqdisho, 8.3.1988

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre,
MADAXWEYNAHA JDS

XEE RMADAXWEYNAHA JDS, L. 16 ee 5 Maarso 1988
Magacaabid Ku-xigeenka Lataliyaha Sharciga ee Madaxweynaha JDS.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 5 ee 2da Febraayo 1980, kuna saabsan Nidaamka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la xoojiyo Hawlwadeennada Xafiiska Latalinta Sharciga ee Madaxweynaha JDS;

DHEGEYSTYNA: Soojeedinta Lataliyaha Sharciga ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Jaalle Drs. FAADUMA CABDULLAAHI XAAJI XUSEEN, darajadeedu tahay A/5, waxaa lagu magacaabay Ku-xigeenka Lataliyaha Sharciga iyo Dastuurka ee Madaxweynaha JDS.

Xeerkani waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynuh waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 5 Maarso 1988

MADAXWEYNAHA JDS
( Maxamed Siyaad Barre )

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 17 ee 1da Maarso 1988, Heshiis Goboleed ku saabsan dhowritaanka Bey'adda Badda Cas, Gacanka Cadmeed iyo Brotokoolka la socda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS; dhowritaanka Bey'adda Badda iyo la-dagaallanka wasa-

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida weyn ee loo qabo kheynta lagala kaashto Dawladaha deriska ah;

MARKUU KU QANCAY: In sida ugu habboon oo ulajeeddadan laga gaari karaa ay tahay iyadoo la meelmariyo Heshiiska ka dhexeeya Dawlado ku yaalla Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed ee iska kaahsanaya la dagaallanka wasakhaynta ka timaadda saliidda la shito iyo maaddooyinka khatarta leh;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

MEELMARIN

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay meelmarisay Heshiis Goboleedka ku saabsan dhowritaanka Bey'adda Badda Cas, Gacanka Cadmeed iyo Protocol la socda ee ku saabsan iskaashi Goboleed la dagaallanka wasakheynta ka timaadda saliidda la shito iyo Maaddooyinka khatarta leh.

Qod. 2aad

AWOOD SIIN

Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Hoosaad ulajeeddadiisu tahay in si habboon loogu fuliyo arrimaha Heshiiska iyo Protocol-ku ka hadlayaan.

Qod. 3aad

DHAQANGAL

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 1 Maarso 1988.

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 18 ee 1da Maarso 1988, Heshiiska Ilaalinta Maamulka, Horumarinta Beyadda Badeed iyo Xeebeed ee Gobolka Bariga Afrika iyo labada Protocol ee la xiriira.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU TIXGELIYEY: Inay tahay lagama maarmaan in laga dhowro Bey'adda Badda wasakheynta lana daryeelo nafleyda badda ku nool iyo xoolaha xeebta ku dhaqan;

MARKUU KU QANCAY: In sida ugu wanaagsan ee ulajeeddadan laga gaari karaa tahay in la meelmariyo Heshiiskan ka dhexeeya dalalka ku yaalla Gobolka Bariga Afrika oo iska kaashanaya arrimaha wasakhaynta Bey'adda Badda siiba markii arrin degdeg ahi timaado;

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

MEELMARIN HESHIIS

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxay meelmarinaysaa Heshiiska Ilaalinta, Maamulka iyo Horumarinta Bey'adda Badda iyo Xeebaha ee Gobolka Bariga Afrika iyo Labada Protocol ee la xiriira laguna saxeexay Magaalada Nairobi 21.6.1985.

Qod. 2aad

AWOOD SIIN

Wasiirka Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer Hoosaad ulajeeddadiisu tahay in si habboon loogu fuliyo arrimaha Heshiiska iyo Protocol-lada ka hadlayaan.

Qod. 3aad

DHAQANGAL

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS.

Muqdisho, 1 Maarso 1988.

MADAXWEYNAHA JDS
(Maxamed Siyaad Barre)

مرسوم رئيس الجمهورية رقم ١٩ بتاريخ ١٤ فبراير ١٩٨٨ :
التصديق على اتفاقية قرض بشأن دعم القطاع الزراعــــى

رئيس الجمهوريـــة

بعد الاطلاع على الفقرة الخامسة من المادة ٦٧ والفقرة الرابعة من المـادة ٨٢ مـن الدستـور .

وعلى القانون رقم ١٩ بتاريـــخ ٢٣ ديسمبر ١٩٨٤ الخـاص بـتعديـل الدستـور .

وعلى القانون رقم بتاريخ ١٤ فبراير ١٩٨٨ والذى بموجبــــه وافقت اللجنة الدائمة لمجلس الشعب على الاتفاقية المبينة ادناه .

ونظرا للضرورة الداعية الى التصديق على هذه الاتفاقية.

يرســـم

المادة الاولى

بمـا هـو آت :

تم التصديق على اتفاقية القرض المبرمة فى مدينة الرياض بالمملكة العربيــة السعودية بتاريخ ٣ - ١٠ - ١٩٨٧م بين الصندوق السعودى للتنمية وجمهورية الصومال الديمقراطية والخاصة بمشروع دعم القطاع الزراعى .

المـادة الثانيـــة

تكون للاتفاقية قوة القانون في جمهورية الصومال الديمقراطية .

المادة الثالثة

يسرى مفعول هذا المرســـوم اعتبـارا من تاريـــخ توقيـــع رئيس الجمهوريــة عليه وينشر في الجريدة الرسميــة .

مقديشو ، ١٤ فبراير ١٩٨٨م

رئيس جمهورية الصومـــال الديمقراطيـــة

- محمد سياد برى -

**XEER WASAARADDA GAADIIDKA BADDA IYO DEKEDA-HA, L. 9 ee 1 Feb. 1988, Guddiga Rarka, Nooliga iyo Magacaabid Hay'adeed, WK & GB/XW/17/(0113)/88**

WASIIRKA WK&GB

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 22 ee 10.10.87 Qod. 82aad;

MARKUU ARKAY: Xeer Sharci Madaxweynaha JDS Lr. WGBDK/XW-17/076/88(A) & WGBDK/XW/17/076/88(B) ee Qodobka 1aad ee 20.1.1988.

WUXUU SOO SAARAYAA XEER NIDAAMIYAHA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Guddiga Rarka iyo Nooliga

Qaybta 1aad

HAWLGALKA GUDDIGA RARKA IYO NOOLIGA

1) Dejinta Siyaasadda Rarka iyo Nooliga.

2) Magacaabidda Guddiyo Baaris iyo Farsamo la xiriira rarka iyo nooliga.

3) Talo ka soo jeedin Magacaabid Xoghaynta Guddiga.

Qodobka 2aad

WAAJIBAADKA GUDDOOMIYAHA GUDDIGA

1) Guddoominta Shirarka Guddiga.

2) Wuxuu isugu yeeri karaa Shirarka Caadiga ah iyo kuwa aan Caadiga ahayn.

3) Wuxuu diyaarinayaa Ajendaha Guddiga.

4) Wuxuu fulinayaa Go'aanada Guddiga.

5) Wuxuu xiriiriyaa Wasiirka WK&GB iyo Guddiga.

6) Wuxuu fulinayaa hawlaha Guddiga muddada u dhexeysa Shirarka Guddiga.

7) Wuxuu saxeexaa Go'aanada Guddiga.

8) Waa Madaxa Maamulka Guddiga.

9) Wuxuu ku hadli karaa Magaca Guddiga isagoo matilaya Guddiga.

Qodobka 3aad

X O G H A Y N T A

1) Xoghaynta Guddiga waxaa Magacaabeya Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda, isagoo dhegeystay talada Guddiga Rarka iyo Nooliga.

2) Xoghaynta waxay ururinaysaa wararka, dokumentiga, tirakoobka la xiriira badeecooyinka iyo Gaadiidka Badda.

3) Waxay keydka dokumentiga la xiriira go'aanada iyo qoraallada Guddiga.

Qaybta IIaad

MAGACAABID HAY'ADEED

Qodobka 4aad

MAGACAABIDDA HAY'ADDA KA QAYB GALAYSA XAMUULKA (GENERAL CARGO)

Shirkadda Maamulka Maraakiibta Soomaaliyeed (Somali Shipping Corporation), waxay wakiil ka tahay dhinaca Soomaaliyeed xagga qaadidda iyo maamulka badeecooyinka dalku dhoofiyo iyo kuwa uu soo dejiyo (Import & Export Cargo) iyadoo ku saleysan Qodobka 1aad ee Xeerka Madaxweynaha JDS Lr. WGBDK/XW/17/076/88(A) ee 20.1.88.

Qodobka 5aad

W A K I I L A S H O

Si ay waajibaadkeeda u fuliso Shrikaddu waxay dalka dibaddiisa ka magacaaban kartaa Wakiilo (Agents), iyadoo hawshoodu tahay ururinta iyo raridda badeecooyinka dalka soo galaya.

Qodobka 6aad

ISTICMAALKA GADIIDKA BADDA

Si ay u fuliso waajibaadkeeda ka qayb qaadashada xamuulka, Shirkaddu waxay isticmaali kartaa Gaadiidka ay maamusho, mid ay soo kireysato (Chartering) ama mid ay qayb ka kireysato (Slot Chartering).

Qod. 7aad

D H A Q A N — G A L

Xeer nidaamiyahan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Gaadiidka Badda.

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 19
Muqdisho. 18 Feb. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali
Muqdisho 1.2.1988

WASIIRKA WK&GB

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamuud Yuusuf Muuse u u soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 11.7.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg Cabdulcasiis Qaabkiisu yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 2x12 kuna fadhiya mq. 144

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad.

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Jul. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 150

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,

WAAXDA MAAMULKA DHULKA

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cali Axmed Faarax uu u soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Tr. ahayd 13.5.86, uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisu yahay Afar Gees Addimihiisuna yihiin 20x20 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad.

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad.

Galbeed Waxaa ka xiga: Wadada Danwadaagaha

B a r i Waxaa ka xiga: Luuq 6 Mit.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar. waxaana laga doodi karaa (30) sodon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Jul. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE

Dr. Xasan Maxamed Sabriye

L. 151

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR,
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH.

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maryan Xaashi Xuseen ay u soo qoratay Arji Waaxda Drulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 29.6.86 ay ku soo weydiisatay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu yahay Afar gees addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Guri dad

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Waddada J/Daa'uud

B a r i waxaa ka xiga: Guri

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) sodon maalmod laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buuga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 8 Okt. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA D/HOOSE
Dr. Xasan Maxamed Sabriye.

L. 152

MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MGH/47/87 Hargeysa 20.12.87

U.J:- Degreeto cusboonaysiin J.W. lumay lambar yahay 367147 ee 8.12.87 Sh.So. 50.000 ku qornaa Cabdirisaaq Caydiid Xaashi laga abaabulay L. 2aad ee Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga codsiga ee uu soo qortay Cabdi Xasan Guuleed ee 16.12.87 ee uu ku codsanaayo in Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan loo cusboonaysiiyo;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa Laanta 2aad ee 12.12.87 ee uu Bangigu u kala diray Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee lambar yahay 498 ee 18.12.87 ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu leeyahay Astaamaha Ujeedada sare ku wada sheegan;

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu iska leeyahay ninka la yiraa Cabdi Xasan Guuleed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansan gareeyo; loona cusboonaysiiyo ninka la yiraa Cabdi Xasan Guuleed, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah, ka dib marka faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi wareega ee lumay ee kor ku xusani ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
Maxamuud Maxamed Ismaacil)

Kaaliyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 153

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/12/88 Taariikhda 18.2.88

UJEEDDO:- Digireeto cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay lambar yahay 542402 ee 1.10.87 lacagtiisu tahay 50,000 Shillin laga sameeyey L. 3aad Hargeysa kuna qornaa Axmed Cabdi Cumar.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Muuse Muxumed Rooble, ee Taariikhdiisu tahay 14.2.88 ee uu ku codsaday in Jeeggaas Wareega ee ka lumay loo cusboonaysiiyo;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed ee Hargeysa ee ku taariikhaysan 20.12.87;

MARKUU ARKAY: Xaashida summaddeedu tahay 189 ee ku taariikhaysan 20.2.88, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa, kuna soo caddeeyeen in Jeeggaas lumay ee sare ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 3aad Hargeysa lacagtiisuna dhan tahay Sh.So. 50,000 kuna qoran Axmed Cabdi Cumar, kuna taariikhaysan 1.10.87;

MARKUU ARKAY: In Jeeggaas Wareega ee lumay lacagtiisa iska leeyahay Muuse Maxamed Rooble;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay lambarkiisu yahay 542402, loona cusboonaysiiyo Muuse Maxamed Rooble, muddo 15 beri gudahood ah ka dibna gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood ka haysata.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa laga codsanayaa in Nuqulka go'aankan lagu dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaas Wareega ee lumay ay cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Max. Gob. W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L 154

MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MGH/10/88 Hargeysa 15.2.88

UJ:- Degreeto cusboonaysiin Jeegagga Wareega ee lumay ee lambarradoodu kala yihiin:-

1) 0867316 ee 15.7.87 Sh.So. 100.000 laga sameeyey L. 1aad ee Hargeysa.

2) 742810 ee 7.7.87 Sh.So. 20.000 laga sameeyey Laanta Boorama ku qarnaa Maxamed Iidle Yaabo. Jeegga Koo-waadna waxa uu ku qornaa Axmed Cali Xasan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu soo qortay ninka la yiraa Maxamuud Cabdi Axmed ee uu ku codsanaa-yo in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taabta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee 19.7.87 ee uu Bangigu u kala diray Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee lambar yahay 053 ee 13.2.88, ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in ay Jeegaggaasi Wareega ee kor ku xusan uu iska leeyahay ninka la yiraa Maxamuud Cabdi Axmed;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar-kiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo ninka la yiraa Maxa-muud Cabdi Axmed, cusboonaysiintana gacanta laga saaro isaga ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maal-mood gudahood ah.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xu-san ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa

Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa

(Axmed Wacays Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faarax Axmed Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1001493 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Mire Cosoble sida ku cad warqadda lam. 2595 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1001493 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Axmed Mire Cosoble.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso J.le Faarax Axmed Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegga War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.3.1988

GARSOORAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Jaashi)

L. 156

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Faarax Axmed Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1087818 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Sayd Maxamed Faarax sida ku cad warqadda lam. 2595 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1087818 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Sayd Maxamed Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Faarax Axmed Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco **Faafinta Rasmiga** ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.3.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Jaashi)

L. 157

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Yuusuf Shide;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0385557 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Cabdulqaadir Faarax sida ku cad warqadda lam. 0181 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0385557 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Cabdullaahi Cabdulqaadir Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Axmed Yuusuf Shide lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood ... bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.3.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Jaashi)

F. 158

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED

MGH/5/88 Taariikhda 24.1.88

UJ:_ Digireeto cusbooneysiin Jeegag Wareega oo lumay.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Siyaad Axmed Cabdi ee ku taariikhaysan 31.12.87, ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Sadexda Jeeg Wareega ee lumay;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu u wada diray Laamihiisa iyo Xisaabaha Guud Xamar iyo Qeybta Sharciyada Xamar, ku taariikhaysan 20.10.87;

MARKUU ARKAY: Xaashida lambar, yahay 001383 ee ku taariikhaysan 24.1.88, ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta 1aad Hargeysa ee ay ku soo caddeeyeen Sadexda Jeeg ee lumay ee kala ah:-

qoraa Cabdi Jaamac Maxamed, lagana sameeyey Bangiga
1) J. Wareega No. 739404 ee 14.10.87 ee Sh.So. 20,000 kuna L/Boorame.

2) J. Wareega No. 0017220 ee 12.10.87 ee Sh.So. 20,000 kuna qoraa Canab Jirde Maxamed, lagana sameeyey Bangiga Laanta 1aad Hargeysa.

3) J. Wareega No. 243556 ee 12.10.87 ee Sh.So. 10,000 kuna qoraa Maxamed Ducaale Bede lagana sameeyey Bangiga Laanta Baarame;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1966kii;

MARKUU ARKAY: In Sadexdaas Jeeg Lacagtoodu isku tahay 50,000 Sh.So. uuna iska leeyahay Siyaad Axmed Cabdi.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Sadexda Jeeg Wareega ee lumay ee lambarkoodu kala yahay:- (1) 739404 (2) 0017220 (3) 243556, loona cusboonaysiiyo Siyaad Axmed Cabdi, muddo 15 beri gudahood ah ka dibna isaga gacanta laga saaro ama cidii awood ka haysata Siyaad Axmed Cabdi.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta 1aad ee Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeegagga Waree-ga ee lumay ee kor lagu kansal gareeyey ay cabasho uga soo ootaan haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Max. Gob. W/Galbeed Hargeysa

(Xuseen Ismaaciil Axmed)

L. 150

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdicasiis Jaamac Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY. In uu lumay Jeeg War. Lam. 0392926 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garbaharay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Cabdicasiis Jaamac Maxamed sida ku cad warqadda Lr. 2596 Qaybta Xis-Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0392926 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garbaharay kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna qoran magaca J.le Cabdicasiis Jaamac Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garbaharay in ay siiso J.le Cabdicasiis Jaamac Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.3.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Jaashi)

L. 160

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO.
MGT/89/88. 7.3.1988.

UJ: Baafin J/War. ee Lam. 0501322, ee Lacag dhan Xanb-aarsan 50.000 sh.so. ee Tr. 17.9.88, kuna qoran Dayr Maxamed Yuusuf.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO.
MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/War. ee Lumay.

MARKUU ARKAY: Ogeysiinta Bankiga Ganacsiga & keyd-ka L/Burco 7.3.88.

MARKUU ARKAY: In uu Lumay J/War. ee Lam. 0501322, sh.so. 50.000.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D,L, ee Sharci Lam. 2 ee 9.9.69.

WUXUU XEERIYEY

In la Baabi'iyo (Ammortamento) J/War. ee Lam. yahay 0501322 ee Xanbaarsanaa Lacagta Dhan sh.so. 50.000 ee Tr. 17.9.87, lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Burco, kuna qoraa Dayr Maxamed Yuusuf, kana lumay Xuseen Cismaan Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaalyeed L/Burco, in ay siiyo Lacagta Dhan sh.so. 50.000 oo ah bedelkii J/War. ee kor ku xusan kadib marka ay ka soo wareegto muddo 20, Casho gudahood ah kadib marka go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Haddii aan inta ka horay sa la keenin wax is hortaag ah.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO.
Dr. Abuukar Islaw Cumar,

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer Burco.
Xuseen Xasan Sugulle.

L. 161

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Ciise Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0967990 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Ciise Cali sida ku cad warqadda lam. 0205 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1965.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0967990 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Axmed Ciise Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Axmed Ciise Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 20.3.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 171

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

MGT/78/88 Burco 28.2.88

UJ:- Baafin Jeegagga Wareega ee Lam. 0461763 iyo 0458078 ee lumay.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin Jeegagga Wareega ee kor ku xusan ee ay soo qoratay Saynab X. Ibraahim Maxamed;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco Tr. 23.2.88;

HADDUU ARKAY: In ay lumeen Jeegagga Wareega ee kala ah 1) J.W. No. 0461763 ee Tr. 25.5.87 iyo 2) J. W. No. 0458076 ee Tr. 5.3.87;

HADDUU ARKAY: Qod. 69, D.L. ee Sharci lam. 2 ee 9.9.1965

WUXUU XEERAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaggaas Wareega lambaradoodu kor ku xusan yihiin oo laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka L. Burco kuna jirtay lacag dhan Sh.So. min 50.000 Sh. konton kun labadaas Jeeg isugeyntooduna tahay 100.000 kuna qoran Saynab X. Ibraahim Maxamed.

WUXUU AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Burco in ay siiso J.le Saynab X. Ibraahim Maxamed Lacagta dhan Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee labada ah ee kor ku xusan, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 20 casho gudahood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii aan intaa la keenin wax ishortaag ah.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

(Dr. Abuukar Islaw Cumar)

Kaaliyaha Maxkamadda G/Togdheer

(X. X. Sugule)

L. 172

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

### GARSOORAHA MGB

HADDUUARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Sheekh Guuleed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0769583 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Sheekh Guuleed sida ku dad warqadda lam. 3000 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

### WUXUU XEERIYEY

In labaabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0769583 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Sheekh Guuleed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso Jaalle Maxamed Sheekh Guuleed la cagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah eeJDS haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.3.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Canbara Wardheere Cigalle;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 044667 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca Jaalle Siid Cali Maxamed Axmed sida ku cad warqadda Lam. 330 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 044667 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 kuna qoran magaca Jaalle Siid Cali Maxamed Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso Jaalle Canbara Wardheere Cigalle lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelki Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddi inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.3.1988

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)